Cutubka 3aad: suugaanta

Waa maxay suugaantu?

Suugaantu waa iidaanka ama koosaarka hadalka.

Taas oo macnaheedu yahay sida duxdu cuntada, dhadhanka iyo damcada ugu yeesho, si fududna hunguriga u dhaafiso, qofka cunana ugu dajiso, iyo sida midabka cagaaran u qurxiyo burka iyo cawska, uguna soo dhigo mid indhuhu ku doogsadaan oo soo jiidasho leh, sidaas oo kale ayaa suugaantu hadalka dux iyo heemaal ugu yeeshaa.

Qaybaha suugaanta

Waxay guud ahaan suugaantu u kala baxdaa laba qaybood oo kala ah:

1. Suugaan dhab ah
2. Suugaan mala’awaala

1. Suugaan dhaba
   Suugaanta dhabta ahi waa suugaanta tuntm a ka hadasha ama xaqiiqda ku qotonta, mar kastana si saxan oo aan madmadow lahayn wax uga hadasha.
   Tusaale ahaan
   b) Waligeed aduunyadda
      Watqigaa nin saacida
      Nina waayaha xidha
      Labadaasi waxan ahayn
      Hore looga waayoo
      Waa nin iyo waagiii

   Xasan X.Cabdilahi (Xasan Ganey)

   t) Ma ogtahay curyaankaba
      Cago looma waayine
      Caynkaa wax loo yidhi
      Kuwa cararayee ladan
      Iney ku cilmi qaataan

   Xasan X.Cabdilahi (Xasan Ganey)

   j) Waa ayaanba ayaan
      Nin aroosanayaa
      Nin iil galayaa

Cabdillahi Qarshe

x) Maxay dantu ciishay wiiloo
Dul qaadiyo deeq lahaayoo
Dadkuna doqon moodayaa

Ibraahin Gadhle

Kh) indha bururey labadooda baal, bidhiq ma dayaane
Mar hadaan bidhaan lagu arkeyn, waa bar kuma taal

Faarax Nuur Wacays

d) Dugsi ma leh qabyaaladi waxay, dumiso mooyaane

Cabdilahi Suldaan Tima cade

r) Ragoow kibirka waa lagu kufaa, kaa ha la ogaado

Ismaaciil Mire

s) Muslin kumaa cabiidsamo waloon, madaxa kaa goyne

Saahid Qamaan

2. Suugaan mala’awaala

Suugaanta mala’awaalka ahi inta badan waa suugaan laga dareemaayo in ay xaqiiqada ka fog tahay, taas oo hanaankeeda guud laga halacsanayo hab khiyaala iyo madmadow aan badheedhihiisu cadeyn.

b) Wadnaha I saranoo
Sambabada I qalanoo
Dhiiga saydhinaayee

Maxamud Cabdilahi Ciise (Sangub)

t) Haduu beerku qaybsamo
Badhbaan adi ku siin lahaa
Wadnahayga bidixna

Waan kuu badali lahaa

Maxamud Cabdilahi Ciise (Sangub)

j) Dhulka waan socdaa
Waanan dhaafsanee
Cirku waa dhaw yahay
Waana dheer yahee

Maxamed Mooge Liibaan

x) Maroodaan u cawsanayaa, maangad yuurura,
Markab labba musbaar jaban tahaan, meel ka kabayaa,
Maqal baan hangoolkaw sidaa, maalin leyl tuban,
Midigtii rasuulkaan ahiyo, mudanow sheekhiiye,
Galabtii makaan ka adimaa, maydhna subixiiye,
Muna'wara waxaan kula shiraa, meeti iyo xay'e,
Samadaan mushaaxaa sidii, malag ilaahay'e

Sheikh Ismaaciil Xaaji Cabdi Ayuub

Kh) kurku awr uu go'an yahaan ii kac leeyahaye
Kalluun baan ka raadshaa, afmeer looga kacay hawd.

Xaaji Cabdi Ayuub

Mar labaad ayaa hadana suugaanta laba loo kala saaraa oo kala ah:

1. **Suugaan la dhaxley**
2. **Suugaan la curiyey**

1. **Suugaan la dhaxley**

Waa suugaanta qadiimiga ah ee aan la garanayn cidii tirisay, iyo goortii la tiriyey midnaba, waana suugaan soo jireena oo laga dhaxlay soomaalidii hore. Taasi oo cidina aanay cid ka sheegan Karin. Waxaana ka mid ah kuwa xoolaha, kuwa agabka aqalka, kuwa beeraha, kuwa xadhkaha lagu sooho, kuwa beeyada, badaha, caanaha iyo qaar kaloo badan.
Tusaale:
b) Shimbiri qaddey

Qaynaanisay
Qoyskaa tagtey
Qoys kale tagtey
Laf qaaday

t) Maroodi maroodi,
Maroodi cadhoole
Haddii col la sheego
Cadaadda ku meero
Hashii cosob waatan

2. Suugaan la curiyey

Waa suugaan wakhtigeedu dhaw yahay inta badana waa suugaan la tiriyey waayadii dhexe iyo kuwii dambe waana suugaan la garanayo ciddii tirisay, waxaana ka mid ah hal abuurada iyaga iyo suugaantoodiiba la garanaayo kuwan soo socda:

b) Coomaadiyaal duulayey, cadan ka keeneenee
Cirka iyo dhulkeys qabsadey, cadhadhaqdoodiiye
Caamir waa saleele anaa, haatan caymadiye
Adiguba caqlaad leedahee, carar maxaa dhaama

Sayid Maxamed Cabdulle Xasan

t) Lo'daydii casayd ragaan, laanta ugu duugay
Wax la liqiyo xoolaba, kuwaan ugu laxaad yeelay
Een lacagta jeebka ugu guray, lohonlahii caydhu
Hadday leebka iyo warmaha ii lisanayaane

Maxamed Nuur Fadal

j) Adhi waa dhalaan iyo haween dhimiradiisiiye
Dhaqaalaha haweenkiyo guriga siima dhaafsana'e
Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geel

Cumar Usteeriya

x) Nin dhirbaaxo quudheed dugsadey, dhaqayadeed maalye
Dhashaadey sigtaa xaajadaad, dhawrtaa abide
Hadaad dhimato geeridu marbey nolosha dhaantaaye
Dhaqashiyo marbey kaa yihiin, dharagu xaarane

Salaan Carabey

Kh) mar wax bixiye aadmibaa lagu maleeyaaye
Adigaan khasnadahaagu madhan, mahade buuxane
Adiguu ku soo magan galaa, ruux madluunihiye,
Kol haddii miciinow la yidhi, meel kalaan jirine,
Cabdi Iidaan

d) Waraabihii diyada loo qabsaday, waagii nebi yuusuf
Walahaan ku dhaartee dadku, sheegay waa kani

Cabdillahi Suldaan Tima cade

r) Nin abwaan ahoo
Ka irmaan dibnaha
Ka aradan gacmaha
Tolow in suldaan
Afka mawgudaa

Maxamed Ibrahin Warsame (Hadraawi)

s) Mana laha nin dooroo,
Dayaxii u soo baxa,
Daamur baa la mariyaa
Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye)

Kooxeynta suugaanta

Suugaantu waxay u kala baxdaa dhawr qaybood oo muhiima oo ay ka mid yihiin

1. **Maanso**
2. **Sheeko**
3. **Riwaayad**
4. **Maahmaah**

1. **Maanso**
   Maansadu waa qaybta ugu salka balaadhan suugaanta uguna mihiimsan soo jireen ahaana ugu da'weyn, tiro ahaan iyo tayo ahaan bana ugu saraysa, waxaana ka mdi ah qaybaha maansada ka kooban tahay:
   b) Gabey
   t) Geeraar
   j) Hees
   x) Buraanbur
   Kh) Jacbur
   d) Jirrab
   r) Afarey

1.1 Gabey

Gabaygu waa boqorka maansada waana ka ugu da'da weyn uguna taariikhda fog qaybaha maansada inta badan waxa tiriya oo lagu yaqaan raga inkastoo dumarka qaarkoodna tiriyaan.

Gabeygu wuxu leeyahay xaraf-raac laba dhaca, mid saddex dhaca, iyo mid afar dhaca. Gabayga xaraf-raaciisu laba dhaco waxa loo yaqaanaa labbaale, kuu saddex dhacana saddexaale, kuu afar dhacana afaraale.

Gabayga sadarkiisa waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah Hokis (Hojis) iyo Hooris, oo sadarka intiisa hore loo yaqaan hojis 'hokis' halka sadarka intiisa danbana loo yaqaan hooris marka laygu geeyana waxay noqdaan meeris. Waxa gabayga lagu gartaa luuq u gaar ah, taas oo ah '' hoyaalayey hoyaalayey hoyaalayey hoyee'' oo sida la sheegay uu ugu horayntii ku gabyey ninkii la odhan jirey "Raage Ugaas"

Tusaale:

Labaale

Dugsi ma leh qabyaaladi, waxay dumiso mooyaane

Saddexaale

Nacab iyo nijaar iyo ujabay, naago iyo tuug

Afaraale

Xasan iyo xuseen iyo xirsaa, kaa xasuus badane

1.2 Geeraar

Geeraarku waa qayb ka mid ah maansada kaas oo xaraf raaciisu hal mar ku soo noqdo miisaankisuna dhisan yahay, si gaarana loogu luuqeeyo, shaqal ama shaqal u eekena ku dhamaada.
Waxa uu isticmaalkiisu gaar u yahay ragga. Waxana inta badan loo isticmaali jirey, amaanta fardaha, guubaabada, difaaca, calaacalka, wanaada, marka ninka gabayaaga ahi gabyana waa lagu soo goyn jirey.

Tusaalayaal

Geeraar baan awalkiisiyo
Anbaduu ku bilaabmiyo
Sida loogu irshaadiyo
Halka uu ku idlaadiyo
Aakhirkiisa hayaayo
Indhaweyd iska daayee
Bal maydiin akhriyaa

Cabdi Iidaan Faarax

Cirku foore daruurliyo
Fasal buu ku da’aa
Geelu dhaysta falaaxiyo
Foosha wuu ku rimaa
Dumar fiid ay hadlaaniyo
Fudeyd waa ku baxaa
Ragna feedho coloowiyo
Anaa kaa fara rooniyo
Ficil weysku dilaa

Ibraahin Mire Willad

Wal hadow faraskayga
Weedh yaroon ku amaano
Wawga maan ka bilaabo

Raage Ugaas

1.3 Hees

Heestu waa qayb ka mid ah maansada waana qaybta saddexaad xagga soo jireen ahaana, heestu waxay leedahay xaraf-raac hal-xaraf ka unkan. Jiib iyo jaan iyo siiqad u gaara oo lagu qaado ayey leedahay. Ragga iyo haweenkuba way u siman yihiin. Waxay u kala baxdaa dhawr qaybood oo kala ah:

b) Hees hawleed
t) Hees koolkoolineed
j) Hees caruureed
x) Hees ciyaareed
Kh) hees faneed

1.3.1 Hees hawleed

Waa heeso soo jireena oo qadiimiya taariikhdooduna dheer tahay, inta badana waa suugaan la dhaxley. Inkastoo ay jiraan qaar la curiyey oo tiradoodu yar tahay.

Hees hawleedka waxa loo adeegsada dhamaan qaybaha kala duwan ee hawlaha dadku qabtaaan. Hees hawleedku waxay leedahay qaybo kala duwan, iyadoo ku salaysan waxa loo adeegsado oo kala ah:

b) Hees hawleedka xoolaha
t) Hees hawleedka agabka aqalka
j) Hees hawleedka beerta/dibiga
x) Hees hawleedka beeyada
Kh) hees hawleedka kalluunka
d) Hees hawleedka dhismaha

Tusalayaal

b) Heesta xoolaha

Heesta adhiga

Adhiyow yar yari,
Waxaa kaa yaryari,
Ma yuraan yurbaa,
Ma yac geesa laa.

Heesta idaha

Galaallo ilmaha,
Gosha galiyoo,
Geed hadh weyniyo,
Galool u hadhgee.

Heesta riyaha
Garooy garo daa,
Oo garba cas daa
Adna giirooy,
Ka gu’weynide
Gardarada daa.

Heest lo’da
Sacba naagta leh,
Salsalowyoo,
Sideeda u socoy.

Heest geela
Ma daruur buu,
Doonayaayoo,
Ma dareer buu,
U diyaar yahay,
Sool inaad tagi,
Soddon inad qadi,
Sulubay biyaha,
Sidaan dooniyo,
Siib siib ugu laac.

Heesta dameeraha
Dameerahayagu,
Waa dir kow kow,
Waa dir kaba la cad,
Waa walaaloo,
Wax la siiyaba,
Way wadaagaan.
Jilbe gaabane,
Jaawe geel buu
Jees u dhaamaa.

Heesta fardaha
Rido soo widh widhaysuu,
I wey daarinayaaye,
Ma walaalkay rumaadiyo,
Wiilkii aan dhalay baa.
Bullo falan iyo
Baroor food weyn

Oo fuqu cad yahay
Waayo lagu fuul
Waase laga filay.

t) Heesta agabka aqalka

1) heesta hararka (cawska)
2) heesta kabada
3) heesta aloolka
4) heesta maydhaxda
5) heesta soohida xadhiga
6) heesta hanta (dhiisha)
7) heesta mooyaha
8) heesta midxinka

Heesta hararka (cawska)

Cawkanow sabool diidow hoyal,

Waqaan suuqa lagu dhigineey hoyal,

Soddon lagugu baayicineey hoyal,

Yaa sameeyey lagu odhaneey hoyal.

Heesta kabada

Naagta kabada laheey,

Kaalin daraneey,

Adan keydba sii dhigan

Naagan daah xidhan

Doca dalooley,

Ninkaagii dabeyshoo,

Tukuhu doonyo doonye.

Awdal laga keenyeey,

Alalag dheereey,

Il bari laga soo aragyeey.

Heesta aloolka

Alla waa xujooy,

Oo waa xujooy,

Geel xerada diidaa,

Waa xujooy,

Alla waa xujooy,

Oo waa xujooy,

Gabadh xilaha diidaa,

Waa xujooy.

Heesta maydhaxda

Wey laago laago, daba huwan

Wey laan galloola, daba huwan

Naa meyla diiran, daba huwan

Kula diiran maayo, daba huwan

Amba weyska diiran, daba huwan

Oo maxad ku diiran, daba huwan

Gudinteyda daabcad, daba huwan

Heesta soohida xadhiga

Xadhigow sululubo sululubo

Saaka sayla yar baan ka soo baxay

Sayla weyn baan socod ku soo maray

Aar saloolanayaan ku soo baxay

Aar salaamu calaykum baan idhi.

Heesta haanta (dhiisha)

Naa fududo fududo,
fara kuguma yaaliine,

Ma furtaa lagaa dhamey.

Naayaa dhigdhigo dhabar yar,

Waagii dharaarowye,

Sow maba dhanaanaatid.

Haantii qabooy qooryar,
Laba qaar laguu kala jar,
Laba qaalin kugu boobtey,
Geel jire ku qooraansey.
Naa baayo beesheenu,
Waa beelo ceebeede,
Yaan subaga lay bidine,
Yaan soo bax la odhane,
Yaan bilistu ii shirine,
Baayoy bullooy ii bax.

Heesta mooyaha

Ila tun ila tun,
Ila taban-taabi.
Alla yeyla tumaay,
Ila taakuliyaay.

Heesta midxinka

Ma hadaan habaroobay,
Habaroobey habaroobey,
Hooyadey hooyadeed,
Ma hadaan la sinaadey.

Heesta beerta/ dibiga

Markey beertu bislaataan,
Badhi gooyo ku siine,

Boorow beerta hagaaji

Markey beertu bislaato,

Baraar qoorta la jiidiyo,

Bariidin badanaa.

Sangahan sayntu cadaatay,

Halkuu suulka ka qaadey,

Libaax sayntu cadaatiyo,

Maka saarey dhurwaa.

Dhiinow raggu waa bir la duubay,

Waana bilaawe afaysan,

Intay naago mooska hurdaan,

Rag mahiidan ogaa.

Hees kool-koolineed

Waa heeso u gaara hooyada oo ay dhasheeda ku maaweeliso, ku aamusiiso, ku seexiso, kuna kool kooliso, iyadoo ku qaada cod iyo siiqad heer saraysa oo dhagtu ku raaxeysto, dhasha maqashaana dareenkeeda kicisa. Inta Badan heesahani waa dhaxal, dhaqankeeduna wuxu u gaar ugu soocan yahay hooyada sharafta leh iyo haweenka soomaaliyeed.

Heesta wiilasha

Hobeey ya hobeey hobeeya,

Ha waalan ha waala loobin,

Ha waayin wax siiso hooyo,

Ha waayin war dheera aabe,

Ha waayin walaala dhawra,

Hashaada lagaama maalo.

Halkaad xalanow xoqayso,

Halkaad xalay ladis ku wadey,

Malaa’igi hakuu salaaxdo,

Dhamow dhuuxiyo laftow’aa,

Dhamow dhalasho amranowaa,

Markaad dhalanteed dhawaaqdey,

Dhamow dhaxan bayga duushay,

Dhirtii baa wada magooshay,

Dhulkii baa wada iftiimay.

Heesta gabdhaha

Waxa wiilowda la hayo,

Waxaa loo waalanaayo,

Haddaan wehel kaa helaayo,

Aduun baa kaba wanaagsan.

Go’dooya go’dooy go’dooya

Go’dooy gaagaabso hadalka,

Geyaan baa guriga yimiyo,

Rag baa goonyaha ka buuxo,

Fardiyo geel bay wadaane,

Go’doy gaagaabso hadalka.

Hees caruureed

Waa hees sida magaceeda ka muuqata ay caruurti ku heesto, taas oo caruuriba caruur u soo gudbinaysay, inta bandanna waxaa lagu tiriyaa ama ay ka mid tahay suugaanta la dhaxley.

Marrkey adhiga la joogaan

Naa hooy dayooy heedhe

Dayo faaraxeey heedhe,

Faadumo ardooyo heedhe,

Faad faatisooyo heedhe,

Waa lay dilayaaye,

Tuugoow mareegaale,

Adigoo laxdii daylo,

Dabadeeda gadaaya,

Qoodhaha mas kaa goosay,

Oo qumayo kaa xagatay.

Hees ciyaareed

1. ceerigaabo
2. saylici
3. dhaanto
4. saar
5. botor (batar)
6. hoobalow
7. hiirimaahee
8. shirib
9. guurow
10. walla saqo
11. riixo
12. jaflo
13. dawlad damiin
14. dillo kabiiro
15. bullo
16. sorrow
17. xayaad
18. aw batiikhow
19. shab-shable
20. shooba
21. sayla
22. wareegtay
23. shabs-shaba
24. wiiro-wiiro

Jiifto

waa qayb maansada ka mida, waxaaney leeday xaraf raac iyo miisaan, waxaaney la hal maashaa heesta gaar ahaan, hees ciyaareedka loo yaqaan botorka, waxa kale oo ay isku mid yihiiin oo ay sarta, miisaanka, iyo xaraf raacabaa wadaagaan masafada.

Jiiftada waxan tusaale uga soo qaadan karnaa maansadii hadraawi ee daalalley:

Marka hore dad baan ahay,

Dad dad reebay baan ahay,

Dunji dhaalan rogtaan ahay,

Hadba fadal durkaan ahay,

Da’da’deed u talisoo,

Ugu damac fog baan ahay

Masafo

Masafadana hadaan tusaale ka soo qaadano, waxa inagaga filan maansada dawo:

Nin kastoo la doortoo,

Darajiyo xil qaadow,

Nin kastoo la doortoo,

Dusha maamul saarow,

Nin kastoo la doortoo,

Mansab loogu deeqow,

Dalka fiiri aashaa,

Dacalada ka jeedaal,

Kolba dacal ka faallee,

Dadnimana ku saameel,

Gobonimo ha daaqee,

Daacadnimo ku heensee,

Bulsho keeda taag daran,

Ka yaboohi darajada,

Danyaraha miskiinkiyo,

Dulmanaha is weydii,

Isagaa ku doortee,

Waxa loogu dawgaley.

Buraanbur

Waa qayb maansada ka mid ah, oo leh luuq iyo cod u gaar ah oo lagu qaado, waxaaney khaas u tahay dumarka, miisaankeedu wuu dhisan yahay, balse xaraf raaca ayay kolba ka baxaan oo iyagoo xaraf ka maansoonayay ayay mid kale u boodaaan ama xaraf kale u gudbaan.

Markey qalcad buraanburi dhacdaba, waxaa la raaciyaa sacab, durbaan iyo mashxarad. Codka iyo luuqda lagu bineeyana waa mid aad u toolmoon, oo dhagtu ku raaxeysanayso ama ku soo jiidanaya “aay hoobalaay hobalaay hadaba”

Milgooy waan kuu duceeye, dareen lahow,

Fudeyd dumar looga rooneey, degani lahow,

Oo dad baa kuu jecelehee, dabuubtayda maqal,

Waxaan kula doonayaa, doqon adoon ahayn.

Waxaan kula doonayaa, da’deed u roon.

Waxan kula doonayaa, sharaftidii dirkaa.

Waxan kula diidayaa, daya halkay fadhido.

Waxan kula diidayaa, dalas iyo ceeb

Waxan kula diidayaa, haween digashadood.

Jacbur

Jacburku waa qayb maansada ka mid ah, balse aan shuruucda iyo xeerarka maansada lagu bineeyo u hogaansaneyn, lana odhan karo waa sugaan laaxim ku jiro. Waxaanu maansadu ku khilaafsan yahay xaga xaraf raac, oo meerisyadu isku xaraf raac maaha, waxaaney bah wadaag yihiin buraanburka oo sida magacyadooda ka muuqata labadoodaba ay ugu danbeyso “bur” oo hadaynu macnaheeda raadino la odhan karo waxay ka

timid ama iyadii la soo gaabiyayba tahay ereyga “burbur”, ula jeedada loo bixiyayna waa iyagoo burburiyey xeerkii maansada.

Tusaale

Gabadheyda timaheedu waa kidigaa meeshaase

Uubaalle xaabaalle waa lagaga hoydaaye

Naagta waalan yaa qabey

Horta mee ninkeedii

Muxuu noogu soo diray

Jirab

Waa marka su’aalo kakan oo tijaabin maskaxeed wata lays weydiiyo, kuwaas oo sursuur ooddan ku jira oo aan si fudud looga saari karin.

Jirabku wuxu u kala baxaa laba qaybood:

1. **hal xidhaale**
2. **googaalysi**

Afarrey

afarreydu waa qayb maansada ka mida, waxaanay ka unkantay dhawr tuduc ama dhawr meeris oo macno balaadhan xambaarsan, sida magaceeda ka muuqata waa afar sadar ama in ku dhaw, oo dadku si fudud u qabsadaan, sida maahmaahdana loo soo qaato marka la arko dhacdo tii la mid ah.

Tusaale

Sidii bahalkii biriishka ka dhacay

Baska iyo jiidhay labada baabuur

Ee baraarugey goor la soo baxay

Ilaahay balankii barqaan kacay

Dhaaxay fogos xumi

Faraha I jartee

Ma hadaan fuuley

Gaadhi foodhi leh.

Sheeko

Sheeko waa qayn ka mida qaybaha suugaanta, waana hadal tiraab ah oo aan lahayn xaraf raac, miisan iyo habdhac midnaba. Balse waa hadal murti ah oo wax laga dhex dheehan karo, kaa soo qarad iyo Ujeedo gaara gudbinaaya. Sheekadu af dadan iyo af daalacan labadaba waa lagu gudbiyaa, sida runta ahna, xaga qabashada way kaga wanaagsan tahay suugaanta kale, inkasta oo ay dheeraato qofku waa ku celin karaaa, waayo sida maansada shardi maaha in ereyada sidoodii loo dhigaa, waxaanay u kala baxdaa labo qaybood oo kala ah:

1. **sheeko gaaban**
2. **sheeko dheer**

Tusaale sheeko gaaban

Wiil iyo gabadh baa ku heshiiyey inay is guursadaan, markaasuu wiilkii aabihii kala tashaday wuxuu damacsan yahay, odaygiina wuxu ku yidhi bal kaalay I soo tus gabadha aan kula soo eegee, ka dibna inta laysa soo raacay ayaa la yimid inanta reerkoodii, reerka waxa joogay inantii iyo inan ka yar oo ay walaalo yihiin oo kaliya. Wiilkii iyo aabihii waxay ugu jawaabeen rag ha joogo ama ayaanu joogine annagu marti ayaanu idiin nahay, waxaanay fadhiisteen ardaagii reerka, ka dibna intay hablihii tashadeen ayay u qaleen neef, hilbihiina way soleen, gabdhaha inantii yarayd ayaa cuntadii u soo qaaday, una keentay raggi waxaanay ku tidhi sidan:

Waan raagnay oo rag la’aan baan leh

Waa riyo oo ido la’aan baa leh

Waa solay oo biyo la’aan baa leh

Ka dibna intay hor dhigtay ayay is rogtay, odaygii baa yidhi waar ma tanaa gabadhii, markaasuu yidhi wiilkiina mayee waa tii ka yareyd. Odaygii oo basarkii iyo habkii inantii hore la sii dhacsan ayay tii kalena weelkii ay wax ku cuneen ka soo doontay, waxaaney Iyana ku tidhi:

Naga raali noqda xerada adhigayagaa ahayd.

In caano la cidey

In caano u cidey

In caris laaladisay

Intaa iyo in dhigeeda ah

Ka dibna odaygii iyo inankiisii dib bay isaga laabteen, isaga oo ujeedadii uu lahaa gaadhay.

Sheeko dheer

Waxa ka mida sheekooyinka dhaadheer ee caanka ka ah soomaalida

1. cilmi boodhari
2. qays iyo Layla
3. kun habeen iyo habeen

Maah-maah

Maahmaahdu waa qayb kamida suugaanta, waana hadal kooban oo dulucda uu xanbaarsan yahayna ay tahay mid qoto dheer, waana hadal murtiyeysan oo macnihiisu balaadhan yahay, waa erayo tisqaad iyo faafidba leh, waa hadal tix iyo tiraab labadaba ka samaysan, waxaanay leedahay madal ama goob ay ku baxday taas oo lagu xasuusto.

Waa hadal xigmadeed aan si fudud loo ilaabi Karin, kaas oo la soo qaato marka dhacdadii ay ku baxday mid la mida ama u dhaw la arko. Suugaan dhab ah ayey u Badan tahay, inkastoo ay jiraan qaar mala’waal ahina, kuwa la dhaxley iyo kuwa la curiyeyba wey leedahay, sidoo kale kuwo la muujiyo iyo kuwa la maldahaba wey leedahay.

Kooxeynta maah-maahda

Inta badan koox koox ayaa laysku raaciyaa sida maahmaahda:

1. raga
2. dumarka
3. geellla
4. sakaarada
5. dameeraha
6. doqonka
7. fariidka
8. nabadda
9. cadaalada
10. dhirta
11. fardaha

12. lo’da
13. adhiga
14. deeqsiga
15. bakhaylka
16. Waqtiga
17. Runta
18. Beenta
19. Geesiga
20. Fulayga
21. Abaarta
22. Barwaaqada
23. Aduunyaddda
24. Aakhirada
25. Cirka
26. Dhulka
27. Guurka
28. Quruxda
29. Foolxumada
30. Caruurta
31. Waayeelka
32. Waalida
33. Miyir qabka
34. Nolosha
35. Dhimashada

Tiraynta maahmaahda

Dhan kale hadaan ka istaagno, waxa lagu kala saaraa tiro ahaan inta ay ka kooban tahay sida:

Maahmaahda halleydda ah, labaalayda ah, saddexeley ah, afarley ah, shanley ah, lixley ah, todobaley ah, sideedley ah, sagaaley ah, tobanley ah.

Tusaalayaal aan soo qaadano inkastoo aanay ku dhanayn

Maahmaahda halleyda ah

1. Saakaro xaar muuqan doonay aasaastaa
2. Kur waayeel waa wada indho
3. Doqon ha u gargaarin hana gargaarsan

Maahmaahda labaaleyda ah

1. Nin reer u weyn iyo umuliso midna siday wax u ogyihiin wax uma sheegaan
2. Raga iyo geeluba mar buu wada godladaa

3. Dheri iyo naago midna yar yaraysi malaha

Maahmaahda saddexleyda ah

1. Saddex alle ma aqbalo
    - Soon soor waa
    - Salaad ku dayasho
    - Samir taag waa
2. Saddex baa rag u liita
    - Nin maqan oon la tebin
    - Nin jooga oon la tirin
    - Nin tegay oon la joojin

Maahmaahda afarleyda ah

Rag waxa ugu liita

- Ciil kama karo iyo calooshiisa la ciyaar

Dumarkana waxa ugu liita

- Casarkii seexato iyo cirkeed bogato

Maahmaahda lixleyda ah

1. Saddex wey ku qooyaan, saddexna wey ku diirshaan
   Saddex wey ku qooyaan
- Qarbad
- Qamaadin roon
- Qaroor odey

  Saddex wey ku diirshaan

- Doob
- Dambar idaad
- Dab

2. Saddex, saddex kama dharagto
    - Il arag kama dharagto
    - Dhulna biyo kama dhargo
    - Dhegina war kama dheregto
3. Saddex waa lagu tarmaa, saddexna waa lagu taran go’aa
   Saddex waa lagu tarmaa
    - Hayn cibaado
    - Hagar la’aan muslim
    - Haye waalid

  Saddexna waa lagu taran go’aa

- Ka tag cibaado
- Ku taagsi muslim
- Ku taah waalid

Maahmaahaha todobaaleyda ah

- Laba jir meel wax ha kula cunin
- Toban jir hala kaftamin
- Labaatan jir hala booto dhigan
- Soddon jir hala seexan
- Afartan jir hala lagdamin
- Konton jir la socdaalin
- Lixdan jir hala garamin

Maahmaahaha sideedlayda ah

Laba way isku oydaa, labana waysku dhimataa, labo ways qaadaa, labana waysa sugtaa

- Laba waysku oydaa oo waa labada indhood
- Laba waysku dhimataa oo waa labada dhegood
- Laba waysku qaadaa oo waa labada gacmood
- Laba waysa sugtaa oo waa labada lugood

Maahmaahaha sagaaleyda ah

1. Saddex waa mugdi, saddex baa ka macaan, saddex baa u mudan
    - Abaari waa mugdi
    - Caws baa ka macaan
    - Doog baa u mudan
    - Colaadi waa mugdi
    - Waan waan baa ka macaan
    - Nabad baa u mudan
    - Jahli waa mugdi
    - Barashaa ka macaan
    - Aqoon baa u mudan

Maahmaahaha tobanleyda ah

Ridu laba raggey ka matashaa, labana dumarkey ka matashaa, labana geelley ka matashaa, labana fardahay ka matashaa, labana lo’dey ka matashaa.

- Laba raggey ka matashaa gadhka iyo reenka
- Laba dumarkay ka matashaa qooraansiga iyo naasaha
- Laba geelley ka matashaa xoorka iyo laaca
- Laba fardahay ka matashaa gurdanka iyo shaashka

- Laba lo’dey ka matashaa geeska iyo giirka

Hababka maahmaahda

Waxa kale oo Iyana lagu qaybqaybiyaa maahmaahyada habka. Waxa jira afar hab oo waaweyn kuwaan oo lagu kala saaro guud ahaanba maahmaahaha afkeen hooyo ku jira waana kuwan:

1. **Hab-toos ah**
   Waa marka maahmaahdu u taalo si cad oo aan madmadow lahayn, tusaale ahaan:
   - Gari labo nin kama wada qosli
   - Hadal dheh ama dhegayso
   - Dantaada ogow nin rag ah waa u waano doqonna waa u cay
2. **Hab-lid ah**
   Waa marka maahmaahdu waxay ku hadashay wax ka soo horjeedaana laga dhex dareemo sida:
   - Nin kuu digey kuma dilin
   - Fiiriyaa ma falo
   - Horu cune dib u qatan
3. **Hab-maldahan**
   Waa marka dulucda maahmaahdu lahayd la qariyo, lagana dhigo mid dadan, waxaana tusaale inoogu filan kuwan:
   - Ragganimo tantaa moogi bey ku jirtaa
   - Hasha geela cuntee cabaada
   - Dhalaankii hooyadii dhalmada baray
4. **Hab-sheeko ku xidhan**
   Waa maahmaahaha aan la fahmi karin ilaa laga sheekeeyo dhacdaday ku yimaadeen, waxaana ka mida kuwan:
   - La jiifiyaana banaan, la joojiyaana banaan
   - Garbi diiri nin daguugan ma weydo
   - Hashu maankeyga gaddee, ma maansaar bay liqdey

Af-maldanaha suugaanta

Afmaldanuhu waa hadal la daday, oo la qariyey dulucdii macnahii u hadalku xambarsanaa, kaas oo loo soo gudbiyey si aan toos u abaarayn waxii looga jeeday, si dadbana loo dhigay xaqiiqdii dhabta ahayd, taas oo fahankeeduna yahay mid xeel dheeri lagu dheehay oo huwan balaaqad qoto dheer leh.

Afmaldahanayaashu waxay ka kooban yihiin dhawr qaybood oo kala ah:

1. **Eekayn (humaageyn)**
2. **Buunbuunin**

3. **Astaameyn**
4. **Duurxulid (shareerid)**
5. **Silan-sugan**
6. **Lagaado (jees jees)**
7. **Qofeyn**
8. **Xus**
9. **Yamxeerid**
10. **Sarbeeb**

1. **Eekeyn (humaageyn)**
   Waa marka laba shay laysku eekeeysiiyo ama laba shay humaag laga dhexaysiiyo, waxaana lagu gartaa isku eekeysiinta afar tiir oo kala ah:
   - Loo eeke, “ka loo eeg yahay”
   - U eeke, “ kii wax u eekaa”
   - Qalab, “sidii, tabtii, noocii, lamida, gaddiisii”
   - Qaab, “ waxa labada shay isaga mid yihiin”

Tusaale

Cawaale	sida	shabeelkuu	u	boodaa
U eeke	qalab	loo eeke		qaab

Derejooyinka isku eekeysiinta

Isku eekeysiintu waxay leedahay darajooyin badan oo ay ka mid yihiin

- Isku eekeysiin dhamaystiran
  Waa marka uu eeke, loo eeke, qalab iyo qaab intaba la adeegsado

Tusaale

Ramli sidii hooyadeed bay u qurux badan tahay

Ramli waa u eeke, qalabkuna waa sidii, hooyadeedna waa loo eeke, qaabkuna waa quruxda.

- Isku eekeysiin qalabku maqan yahay
  Ramla iyo hooyadeedba, way qurux badan yihiin
- Isku eekeysiin qaabku maqan yahay
  Ramli waa sidii hooyadeed
- Isku eekeysiin qalabka iyo qaabkuba maqan yihiin
  Ramli waa hooyadeed

Faahfaahinta loo eekaha

Sida carab macdaar wacan dhigtoo, muhindisoonaaya,

Oo muqayil tagay xaafad, waa lagama maarmaane,

Oo tuug musbaarada guroo, muqadinka u saarey,

Oo aan madhax danbiyo rasaamaal, meel ka dayaneynin,

Madoobaadayey xalay miyeey, murugtay laabteydu.

Sida naag ninkeedii mudnaa, mawdku kala qaaday,

Oo macangow liitoo u hadhay, yeeshay meherkiisa,

Oo iney ka meermeeriyaan, magane dooneysa,

Madoobaadayey xalay miyeey, murugtey laabteydu.

Sida inan mabsuuda oo rug, wacan mushaaxaysa,

Oo oday masaa’ibi dhaloon, laga miraaxaynin,

Oo inan ku meeraysan jirey, meel fog ka ilaaqdey,

Oo habar madcuuna u dirayoo, muqadinka u saarey,

Oo faraqa makaanka u galoo, madax wareeraysa,

Madoobaadayey xalay miyeey, murugtey laabteyda.

Foolxumada isku eekeysiinta

Foolxumooyinka isku eekeysiinta waxa ka mid ah ama lagu yaqaanaa qodabadan soo socda:

- Humaag aad laftiisa isku macnayso
- Humaagyada aan is lahayn
- Humaag aan la aqoon oo aad ku macnayso humaag aan la aqoon

Geel waa geel wixii gooyaana waa geel

Magaalada geed ku yaal muxubooy

Ayaad midabkisa leedahaye

Sidii geed ku yaal bankii giriyaad

Goonidu waa mid laygu talo galay

2. Buun buunin

Waa marka wixii laga hadlaayey, si xad dhaafa loogu talax tago, ka badbadin iyo ku dardarsi aan caqliga qadan kareyn lagu sameeyo. Buun buunintu waa is barbar dhig aan wax badan ka fogeyn isku eekeysiinta qalabka iyo qaabku b aka maqan yahay:
Tusaale
Cali waa libaax

Tixda
Abidkeyba meel lagu jabaan, jiqlo weynaaye,
Dagaalkii jidbaale iyo xuneyn, ninkii joogey baan ahaye,
Ilaahay I jecelaa muxuu, jirey arwaaxeyga.

Kurka sare hadii laydin jaro, kubabka meermeersha,
Kun la dirira idinkoo kontana, weydun kaafiyiye,

Aakhira nimaan geel lahayn, lama aamanayn,
Maxaan idinla awlaadsadaa, awr ma dhaansado’e

Soomaali carab iyo hindida, soya laga keenay,
Inta samada hoos joogta, waad ugu sareysaaye,
Soo soco sacdiya qaaliyey, saanad baad tahaye.

Markey maqan tahay
Magaalada dhami,
Mugdi weeyoo,
Way madawdahay.

Timo boqonta joogo,
Baal gorey admoodo,
Baarkana casaankii,
Bidix midig is gaadhoo,
Burcad lagu xineeyo,
Badh ku seexaneysoo,
Huwaneysa baaroo,
Barkeysoo qaaroo,
Igu beertay laashoo,
U buseelay maan baran.

3. Astaameyn

Waa marka wixii laga hadlaayey aan si toosa loogu dhawaaqin ee astaan uu leeyahay la soo qaato.

Tusalayaal

- Shan aan haanta iska waraabin
- Hal naaskeed markaan gaadhey
- Sida ganba yarta yeynaan u wada dhaqmin
- Aabaha waa qorax casar joogta
- Indhaha ayaan yar caseysanayaa
- Fartaad dhexda ka qaniini
- Fartuu noo godey

Tixda

Hal naaskeed wax gaadhaa markuu, haan kastu u joogey

Halkaa yaa ku filan maalintii, la hindiseynaayey

Waxa laysla helay maykal baan hadalku seegeyn

Guntii kaliya anigoo leh baa geedku la diraye

Maansada anoo gabana baan gaadh ka hayn jiraye

Waxba foox ma taro, nimey janada faro ka yaaliin

Nin yahaw labada giniyeen is gayin, jeeb iskugu geeya

Ee galabta ila joogaaye godey, ka sheekeeyey

Wallee laba gacmoodshow, aniga kaama guro sheeko

Ninkii ooridisii rag kale igdhaan ahaye

Nin walaalkii ugaas yahoo eeday baan ahaye.

4. Duurxulid ama shareerid

Duurxulku waa marka hadalka ujeedadiisa la qariyo ama wax kale lagu badalo halkiisii iyadoo qaradka laga warwareegaayo

Tusalayaal

Higlooy timahaaga hawska ah

Wixii ku halaaba lama helo

Nin saboola iyo awrba wey sibiq dhaqaaqaane

Labadaba haddaan seeto celin socod ma daayaane.

Afar laba lix jeer buu sidaa iiga loogsadaye

Mar uun igama liibaansanine wey ladaabsadaye

Cudurka kaa gala fardaha

Hadii laga gubo dameer

Dawada lama gaadhayee

Hasha diida awrkeeda

Awr kale ku orodaa

Afartaba dab laga saar

Wey abaaso seegtaa

Gamaankiina badan faytinoow, gobolba waa cayne

Qaar baan ka goor iyo ka goor, godolka daynayne

Qaar baan garmaamaha la berin, gaabisna u dhalane

Waar hadaa niman goba tihiin, go’aha noo doorsha

Hadal goba’a ayay saahidow gobi la yeedhaaye

Nin gamaan yaqaan fardaha wuu gaasa bixiyaaye

5. Silan-sugan

Waa qayb afmaldahan ka mid ah, waana marka laba erey oo isa seegan laakiinse macquul ah meel laysugu keeno

Tusalayaal

- Haday fooli timaado guda qarsiimo hadhey
- Nin weyni wadkii wuu yaqaanaa
- Walaalkaa fayna kuuma ogola, foolxumana wuu kugu caayaa
- Camamar hooyo nin diidey, caruur la;aan buu mutaa
- Wax badso wax beel bey dhashaa
- Fiqi tolkii kama jano tago
- Uur hooyo waa ugur tumaal
- Raganimo dantaa moogi bey ku jirtaa

Tixaha

Kurku awr go’an yahaan, ii kac leeyahaye,

Kalluunbaan ka raadshaa afmeer, looga kacay hawd

Dhulka waan socdaa,

Waanan dhaafsanee,

Cirku waa dhaw yahay

Waana dheeryahaye

Xalley waxa isniintii I helay, toban amuuraade,

Asal gama’ waan is idhi hadana, uurka kama seexan

Albaabada dushaan ka xigey, aqalna waan jiifaye

Oon baa I gawracay oo biyaan, ku ag wareegayey.

Uffo dhibicdu may wadan hadana, ooduhu luley

Awaarihii ma nabin hadana, wuu anfacay keynta

Waxan ahay macaan iyo qadhaadh meel ku wada yaal
Bidixdeyda iyo midigteydu waa laba mataanoode
Midi waa marti soora iyo maata daadihise
Midina waa midiyo xiirayiyo, muriyo deebaaqe.

Galabta makaan ka adimaa, maydhna subaxiiye
Maroodaan u cawsanayayaa, maangad yuurara
Maqal baan hangoolkow sitaa maalin iyo layle
Muna wara waxan ku shiraa meyti iyo xay'e

Nin dhirbaxo qudheed dugsadey, dhaqayadeed maalye,
Dhashaadey sugtaa xaajadaad dhawrtaa abide
Hadaad dhimato geeridu mar bey nolosha dhaantaaye
Dhaqashiyo mar bey kaa yihiin dharagu xaaraan.

Nin abaar ku geediya hadaad oolin kari weydo
Iska aamuskaa ka roon waxad ogtahay sheeg

Baadida nin baa kula deydey, daalna kaa badane
Oon doonaheyn inaad heshana daa'in abidkaaye
Dadkuna moodi duul wadda dhashoo wax u dahsooneyne
Dallo malaha aakhiro hadii loo kitaab dayo.

6. Lagaago (jees-jees)

Waa qayb af-maldanaha ka mid ah, waana marka laba erey oo isa seegan ama lid isku ah hal tuduc lagu kulmiyo, loona dhigo si jees jees leh oo quusini ku jirto.

Tusalayaal

- Cir guje “ nin gaaban”
- Ilka case “ nin ilko la”
- Ciirtaa dhama caydaada yaqaan
- Baqal fardo la daaqday faras bay is moodaa
- Buro sanka kaaga taal xanuuna looma goyn karo foolxumana looma sidan karo

Tixda

Ninkaan buurta guradeeda dheer, anigu gaadhsiiyey

Ee gunteeda iga sheemayaan, gacalkey moodaayey

Gabadhuu jeclaa iyo ninkaan, gaaridaw mehershay

Ee taydii iga guursadaan, gacalkey moodayey

Waxba yaanu xeerkay I marin xoolana I siine,

Xaasha nin libin kaa xistiyey xumihii waa yaabe

Muslinimo nimaan kugu dhaqeyn, muumino khaasa

Gaal maxasta kuu dhawra ood magansataa dhaama

Marwo camal xun maangaab ninkeed maqashaaba dhaanta

Walaal aan mushaawiro lahayn, ma lihibaa dhaanta

7. Qofeyn

Waa qayb af-maldanaha ka mid ah, waana marka waxaan qof ahayn ama aan maqal iyo jawaab celin looga baran, sida qofka loola hadlo ama looga hadliyo

Tusalayaal

- Geellow gaal iyo islaam yaa ku leh
- Waraabow adhi maad ii raaci

Tukaa yidhi:

Shimbiraha intaan ugu yarey, waa ku hilibka

Intaan ugu weynahayna waa ku hadhuudhka

Tixda

Shimbiryahow ma duushaa

Ma dabaylo raacdaa

Shimbiryahow dabaylaha

Daruuraha dhex marayaa

Daa’imkii ku uumaa

Orod kuugu daw galaye

Adna cayku ku gooyoo

Anna caato ku raagee

Caddaawoow labadeena

Midkeenee cabanaayee

Cagta loo dabciyaa

Guuguulayhow ciyaayaa hadaad, guga u ooyayso

Abaar geeg ma reebaa dhacdiyo, gaatamoo kale’e

Fiinyahay adaa ooyayoo, oohin ciirsadaye

Haddii aan laguu iman, wad aamusi lahayde

Maxaad aragtay waan kula qabaa, uurku taalada’e

8. Xus

Xusku waa qayb afka maldanahan ka mid ah waana marka xasuus wadareed ummad ka dhaxaysa la soo qaato

Tusaale

Maskii good ahaa iyo ninkii, loo gar naqahaayey

Guurtidii kolkii loo wacee, taladii loo guuley

Cid gungaadha xaajada, kolkii goobtii laga waayey

Waxay gocatey ooy eersatey, oo gabogabo u diiday

Waa maasaartuu xididkey gashiyo, gabankey aasteene

Laf libaax dharqadey uu jiidh iyo dhuuxba ka idlaystay
Ha u dhuran dhurwaagii laftuu dhuuxey eersaday

Waraabihii diyada loo qabsadey waagii nebi yuusuf
Walahaan ku dhaartaye dadkuu sheeegay waa kaniye

Haabiilba qaabiil markuu qoonsaduu dilaye

Qayaash maash dhurwaabaa libaax qaybi yidhi soore

Habartii docdeediyo
Dagalkay ku nooleyd
Daruuruhu ku hooreen
Dadba wada Hel moodoo
Daad wararac bey tidhi

Cawl baa midgaan soo ganbiyey, oo soo gabraar tagaye
Isagoo wax lagu gawriciyo, gaarisiba haysan
Jeenigey gif siisoo miday, qodatey gaareeye
Adiguna gadiibaad tahoo, ways gunaanadiye
Dhilawyahankii geedkii,
Lagu beeriyo dhiiggiyo
Dheecaankii wadhatada
Dhexda tallow iskaga maray

Dhirtu maw abtiriyaaa
Sida dhalashadeediyo
Dhaqankeedu kala yahay
Mise wuxu ka dhigan yahay
Habartii mar dhooftee
Doonidu la dhacantee
Badda dheelligeediyo
Dhaxantiyo dabaylaha
Dhawawalan ka qaadee
Iyadoo dhaqaaliyo
Nafba kala dhaqaaqeen
Kadib dhawr ayaamood
Salka dhigatey ciidee
Dhuloow kaama kaco tidhi

Godbaa in cunay bari
Guursadey habeenkii

Galab aan adoogey
Geed uu fadhiyi jirey
Sheeko gaaban kaga gurey
Wuxu yidhi guyaal hore
Boqor geesalaa jirey

Ma nin doonayaa tahay
In darmaantu weligeed
Daaaradooda joogtoo
Waxa aad daniyeysaa

Dar alle abeesada

Sidii uu dushaa sare

Dabagaale uga qabey

Adna inaad darmaantaa

Kula daawo dhigatood

Hadba daawashada guud

Iska daymo bogataa

Yamxeerid

Waa qayb ka mida hababka wax loo maldaho waana marka is dayrin iyo is diidsiinba leh cid loola hadlo

Odhaahdda

Lagu kaakac

Waa nin iyo waagii

Lays mood

Haba sheegin

Cirkaan iska haynaa

Tiraabta

Ninbaa uu yimid nin hilib cunaaya markaasuu ku yidhi reerihii baan ka imidoo gurigaagiina waan soo maray, ninku aad buu u diifaysnaa, xoolo yar oo uu magaalada keenayna waa laga iibsan waayey, markaas buu ugu jawaabay kii hilibka cunayey

B: marinkaaaga ahaa

T: gabadhaadiina way umushay

B: sedkeeda go’ay

T: laba mataano ah bay dhashay

B: sideeday u uur weyneyd

T: labadii mataan mid baa dhintey

B: malagii baa galay

T: kii kalena wuu raacay

B: meel uu ku hadhuu waayey

T: middidaadu af -weynaa

B: waan ku ogaa

T: cadkaad cunaysaa baruur weynaa

B: waa waxan ku raacay

Ninbey culimo u soo hoyatay, waxaana caado ahayd in ninkay culimo u soo hoyataa wax u qalo habeenkaa, isagoo taas ka cararaya oo hadalka kor u qaadaya culimadana maqashiinaya ayuu ku yidhi afadiisii naa heblaayooy culimada:

- saan eygii u soo gogol
- saalo doofaartiina u soo shid
- sacii boolida ahaana u soo lis

Tixaha

nin ooman oo meel dheer ka soo lugeeyey baa islaan gurigeedii joogta u yimid markaasuu ku yidhi biyo I waraabi, ka dibna waxay ugu jawaabtey sadaradan:

waatay gooman noqotaa

oo gu’ga la waayaa

amba maan gasiimanoo

maan goosan hiliboo

wax ma saarin gawsaha

baalaleyda duushaan

boostiyo waraaqaha

boqol jeer u dhiiboon

waxan baalka ugu qorey

kala baadney baadnoo

kala beelo noqonee

barinaye ma barideen?

Waxay tidhi balaayiyo

Baas maanu sheegine

Maxaa adiga kuu ba’an

Weligeed aduunyadda

Wakhtigaa nin saacida

Ninna waayaha xidha

Labadaasi waxan ahayn

Hora looga waayoo

Waa nin iyo waagii

Sarbeeb

Waa qayb afka maldahan kamida waana marka si dadban oo aan la wada fahmayn balse dadka qaar isla garanayaan hadal maldahan laysku yidhaadho. Sarbeebtu tix iyo tiraabba way gashaa, waxa aanay isku bah yihiin hal xidhaalaha, dhanka kale waxay la hal maashaa ama u eeg tahay duurxulka

Tusaale

Cirkan carrabka la gaadhi lahaa

Cagaha wax ka day

Xaar mas baad igu noqotay

Tiraabta

Nin waayeela ayaa isagoo magaalo jooga, wiilkiisii fariin u diray waxaanu ku yidhi, ninkii fariinta ka qaadayey markaad gaadho inankaygii waxad ku tidhaahdaa, aabahaa waxa uu ku yidhi “shanta salaadood weyso qudha baan ku tukadaa” wiilkii inta uu fahmay in aabihii baahi ka cabanayo ayuu nin ugu soo dhiibey jog subaga oo buuxa, waxaanu ugu soo dhex ridey soddon

wasladood oo hiliba, ka dibna wuxu ku yidhi alaabtaas aabahay u gee oo waxad ku tidhaahdaa “ aabo bishu waa soddon baliguna waa buuxaa” ninkiina intuu laba wasladood kala baxay ayuu u geeyey intii kale fariintiina u sheegay. Odaygiina intuu tiriyey hilbihii ayuu ninkii ku yidhi laba wasladood baad la hadhay.